



## Sida dib Loogu Shido Chromebook, Windows, ama Mac Device


Dib u shidida waxaa weeye nidaam dib loogu bilaabay shaqada kombuyuutarka isaga oo la isticmaalaya haadhweer (sida, badhanka shidida) halka sooftiweer laga isticmaali lahaa. Dib u shididu waxa ay mararka qaar daruuri u tahay kadib marka lagu shubo sooftiweerka, ku shubida cusboonaysiinta obereetin sistemka, hagaajinta khaldaadka, ama dib u bilaabida diraaqfarka ama aalada haadhweerka. Isticmaalka tilmaamahan ee talaabo talaabada ah ee dib u shidida aalada Chromebook, Windows ama Mac.


### Chromebook:

Isticmaal mid kamida ikhtiyaaradan. Waxay kala duwanaan kartaa iyada oo ku xidhan nuqulka Chromebook-ga.

1. Riix oo qabo mid kamid ah badhamada kiiboodhkaaga ilaa 3 ilbidhiqsi ama riix badhanka Bakhtiinta ee shaashada kasoo baxaya.
2. Isticmaal Ctrl+Shift+Q+Q. Riix oo qayb ctrl iyo shift oo kadibna qabo Q key 2 laba jeer.
3. Riix oo qabo Refresh (Dib u Cusboonaysii)  iyo Power (Bakhtiinta)  badhamada ah isla mar kaliya.

### Windows:

Riix badhanka Windows  ee qaybta hoose ee bidixda ee shaashada. Riix falaadha Log off (Ka Bixida) iyo kadibna Restart (Dib u Bilaw). Markaa shaashadaadu dib ha u wada shidanto kahor inta aanad bakhtiin.




### Mac iOS

Waxaa jira afar dariiqo oo aad dib ugu shidi karto Mac kuwaas oo ku xidha sida ay aaladaadu u jawaabto.


#### **Ikhtiyaar 1: In dib looga shido menu barka**

1. Riix calaamada Apple ee dhinaca sare ee bixid ku taala shaashada.
2. Muujinta hoos usoo furmaysa ee soo baxaysa, riix "Restart (Dib u shid)..."
3. Kombuyuutarku inta uu bakhtiyo ayuu inyar kadib is shidi doonaa.



#### **Ikhtiyaarka 2: Dib u shidida iyada oo la adeegsanayo badhamada**

1. Waxa aad si isdaba jooga u riixdaa "control" furaha ah iyo banadhanka soo saarida, kaas oo qaybta sare ee kiibaadhka ku yaal iyo falaadha kor u jeeda ee khadka dhuuban.
2. Dooro "Restart (Dib u shid)" oo daaqad ayaa soo bixi doonta.



### Ikhtiyaarka 3: Dib u shidida iyada oo la adeegsanayo badhamada

1. Riix "control", "command (amarka)" iyo badhanka furitaanka isku mar.
2. La soco, tani si toos ah ayay ugu diraysaa kombuyuutarkaaga inuu dib isku shido oo waxaa dhici kara in uu kuu kaydsami waayo wixii fayl ah ee aad ka shaqaynaysay.

### Ikhtiyaarka 4: Waxa aad dib uga shidaa adiga oo bakhtiinaya

Hadii kombuyuutarkaagu uu ka jawaabi waayo wax kamid ah qaababkan dib loo shidayo, markaa waa inaad gebi ahaanba bakhtiisaa.

Si aad gacanta uga bakhtiiso, kaliya waxa aad qabataa badhanka shiditaanka (goobaabta jaandiga ah ee koonaha kaga taala kiibaadhka) ilaa lix ilbidhiqsi. Kobuyuutarkaagu wuu bakhtiysi doonaa oo gebi ahaanba uu wada bakhtiysi doonaa. Waxoogaa u yara kaadi si aad dib ugu shido.

